



**WAAXDA  
GAADIIDKA**

Dugsigaaga ku ekow . Waqti walba , maalin walba!  
**Waa  
Shaqadeenna!**

Fadlan buuxi arjigaan keliya **kaddib** markaad eegtid qaab meertada joogsiga shitaawe aadna garwaaqsatid in xaalkaagu u baahan yahay tixgelin khaas ah.

Usoo dawi codsigagaaga bedelista barta joogsiga shitaawaha: Route Programmer  
E.P. Schools Transportation Dept.  
8055 Wallace Road E.P., MN 55344  
or Email transportation@edenpr.org

Markii aad codsigagaaga samaynaysid, fadlan maanka ku hay:

- Meertada joogsiga shitaawaha waxay wada saamaynaysaa dhammaan rakaabka iyadoon loo aabbayeelayn inay deggan yihiin qiimaha bartaas iyo in kale.
- shitaawayaashu masoo galaan xayndaabka gudaha, waddooyinka gaarrra ah (tusaale. gudaha apartmentooyinkaiyo guryaha wadaagga ah), waddooyinka soo xirma oo aanay badqab ahayn in lagu kal wareegto. Aan ka ahayn shitaawaha sida ilmaha curyaanka ah. Dhammaan ardayda, iyadoon loo aabbeyeelin da'dooda heerka fasal ee meelahaan deggan waa inay usoo lugeeyaan barta joogsiga shitaawaha intay doonto ha u jirtee.
- Inay bannaan yihiin marinnada wadada geeseheedu laguma darsan qaabka xulashada abuuridda joogsiyada shitaawaha. Inta badan Eden Prairie waxaa la qaabeeyey marin la'aan.
- Shitaawayaashu waxay tagaan arday badan aqalladood maalin walba. Shitaawe gurigaaga soo ag mara kuuma ballan qaadayo ku daris/iyo beddelaad bar joogsi shitaawe.
- In joogsiga shitaawuhu u muuqdo guriga kama mid aha siyaabaha aan ku salayno abuurista joogsiyada shitaawaha. Joogsiyada shitaawugu waa baraha soo ururinta xaafadda. Haddii waalid/masuul ka walaacsan yahay barta joogsiga shitaawaha waa inuu ula soo lugeeyaa ilmaha goobtaas si uu u ilaaliyo. Waxaad waaliddiinta/masuuliyiinta ku adkaynaynaa inay ruux qaangaar ahi la joogo ardayda markii ay halkaas xaadir ku yihiin.
- Si loo joogteeyo meelayn caddaalad ah ee joogsiyada shitaawayaasha, kuma salayn karno abuurista joogsiyada shitaawayaasha xaalad shakhsi sida xaaladda shaqo ruux, haynta ilmaha ama kuwo la dhashay.
- Wadeyaasha shitaawayaashu sharci uma laha inay wax ka beddelaan joogsiyada shitaawayaasha, inay sidaa yeelan waxay sababi kartaa in tallaabo sharciga waafaqsan laga qaado oo ay ka mid noqon karto inay shaqadooda waayaan. Waxay si ku meelgaar ah u samayn karaa isbeddel taasoo xaaladda cimilada ku wacan tahay, siday doontabase ha ahaatee waa in waduhu waaxda gaadiidka hore ugu sii wargeliyaa.

Magacaaga \_\_\_\_\_ Taar \_\_\_\_\_

Cinwaanka \_\_\_\_\_

Tel (Maalintii) ( \_\_\_\_\_ ) \_\_\_\_\_

Magaca Ardayga \_\_\_\_\_ Fasalka \_\_\_\_\_

Dugsiga \_\_\_\_\_ Shitaawaha # \_\_\_\_\_

Barta Cusub ee Joogsiga Shitaawaha \_\_\_\_\_

Barta la Codsaday ee Joogsiga Shitaawaha \_\_\_\_\_

Muuji sababta codsigagaaga:

Lama aqbali doono isbeddel ama dibu eegis inta lagu jiro labada toddobaad ee furitaanka dugsiga ugu horraysa.

**XUSUUSNOW:** Codsigaaga waa la eegi doonaa waxaana laga yaabaa in goobta lasoo booqdo si loo hubiyo in xogta codsiigaani ka kooban yahay sax tahay. Waa lagula soo xiriiri doonaa marka go'aan la gaaro. Wax isbeddel ah oo dhaqan geli doonaa ma jiraan ilaa adiga iyo dadka aad isku joogsiga tihiin lagu wada wargeliyo.